



## Coronavirus: Macluumaad ku saabsan tallaalka ee Kanton ka Valais

*Tallaalku waa lacag la'aan waana ikhtiyaari.*

### Goorma ayaan is tallaali karaa?

- Laga bilaabo 12 sano jir
- Goorta aanan lahayn qandho ama astaamo kale ee lagu garto Covid-19
- Goorta aanan xasaasiyad u lahayn unugyada uu ka koobanyahay tallaalka (PEG). Markii shaki yimaado, la xiriir dhakhtarkaaga gaarka ah.
- Goorta aanan ku jirin go'doomin ama takoorid.
- Laga bilaabo seddax-bilood labaadka ee haweenka uurka leh (kadib marka la helo oggolaasho qoraal ah iyo ka baaraan degid Dhib / Dheef, inta lagu gudajiro xog-wareysiga dhakhtarkeeda)

### Maxaa la sameeyaa si leysku tallaalo?

Is-tillaalida, sidoo kale, waa ka suurtoagal dhakhaatiirta qaarkood ama farmashiyada. Ku xog-wareyso E-mail / telefoon, dhakhtarka ama farmashiyaha ay khusayso is-qoridda.

Is-tillaalida wuxuu kaloo suurtoagal ka yahay xarumaha tallaalka ee Brig, Sion iyo Collombey marka aad **isku qortid** cinwaankaan <https://vs.covid-vaccin.ch>. Kahor intaadan bilaabin habraaca is-qorida, waa in aad soo diyaarsato kaarkaaga caymiska caafimaadka iyo taleefanka gacanta. Haddii aadan la qabsanin aaladaha informatikada, caawimaad weydiiso qof aad iskudhowdhiin ama wac Khadka Taleefanka +41 58 433 0 144.

Goorta ay dadku yar yihiin helitaankuna ku filan yahay, waxaa ayadane suurtoagal ah in la isku tallaalo **ballan la'aan**, dadka jira 16 sano iyo kabadan, ee xarumaha Brig, Sion iyo Collombey. Maalmaha iyo saacadaha, bartaan ayaa laga helaa <https://vs.ch/coronavirus>.

### Maxaa la sameeyaa si loo tallaalo caruurta da'doodu u dhexeyso 12 – 15 jir ?

Waalidiinta doonaya inay ilmahooda u qoraan tallaalka, waxaa lagu baraarujinaa inay, si toos ah ula xiriiraan dhakhtar-caruuredkooda ama dhakhtarkooda. Haddii uusan asiga sameynin ka tallaalka COVID-19, tallaalka kooxda da'daan ah, waxaa iyadana ka suurtoagal ah, laakiinse waa **ballan keliya**, meelaha soo socda:

- Xafiiska dhakhtarka Dr Simon Fluri (Viège)
- Xarunta tallaalka Sion
- Xarunta carruurta qeybaha-badan ee Chablais Valais (Monthey)
- Is-qoridda : <https://vs.covid-vaccin.ch>
- Rugta caafimaadka ee Dr Jean-Michel Poncet (Monthey); diiwaangelinta email ahaan [jmponcetped@hotmail.com](mailto:jmponcetped@hotmail.com) ama taleefanka 024 472 12 62

Macluumaadka caamka ah ee COVID-19 ee Valais : <https://vs.ch/coronavirus>  
Macluumaadka caamka ah ee COVID-19 ee Suisse ka: <https://ofsp-coronavirus.ch>  
Khadka tooska ah ee Kantonka Valais waa **+41 58 433 0 144** Waxaad ka heli doontaa macluumaad dhinac walbo ah ama hadii ay kugu adag tahay sida la isugu qoro xarumaha tallaalka.